

CUTUBKA 13aad

200:Jeegaan=Qaansaroobaad.

201:Onkod=Waa Dhawaqa roobabku sameyaan kolka ey da'ayaan.

202:qayood=Waa roob xoogaa ah oo aan biyo badan keenin.

203:roobladhac:=Cayayaan cascasi oo la arko kolka roobku da'o.

204:sabaad=Waa magac kale oo loo yaqaan roobka.

205:sagal=waa midaba cadceeddu sameyso aroortii kolka soo baxeyao ee isku ballaariya beyniga qorrax ka soo baxa .

206:sayax=dhedo.

207:shuux=Waa roobka dhibcaha yar yar ee aan muddo dheer socon isla kolkaana aan biyo dhigin.

208:suyuc=Qoyaanka ladareemo kolka dhulka roob helo ama qoyaanka laga dareemo meel huurtay.

CUTUBKA 14aad

209:Dooxo=Dhul ballaaran oo gudubkiisa iyo dhirerkiisu aad u weyn yihiin oo yare deggan ama godan.

210:Dul=Meel kasta dusheeda sare.

211:Dullo=Buro Xiriisan rakadooda sare.

212:Dululaati=Meesha bannaan ee udhaxeysa cirka iyo dhulka.

213:duud=Dhul dhir badan ku taal oo kolka aad meel durugsan ka soo eegayso.

214:Faro=Dhudhubo badan oo yare Waaweyn Oo Hal beyni(jiho) U wado biyo Shuba.

215:feddo=Dhulka oogada ah ee la tago Kolka dhul hoose oo godan laga soo baxo.

216:gaaroodi=Dhulka kaymaha yar yar ah ee dhirta quraca ahi ku badan tahay.

217:gol=Dhulka golxada ah ee ku samaysma buuraha taxanaha ah ama buur ballaaran dhinaceeda.

CUTUBKA 15aad

218:Gumac=Rasasta wax lagu toogto inta wax disha.

219:Gaalshire=Xisbiga ugh weyn mugadishu.

220:Tumaati=Tooreyda ama waranka oo la isku tuuro si wax loo dilo.

221:Waran=Magac ka dhaxeeya Hubkii wax Lagu tumaatiyi jiray.

222:Tabaalo=Qof ama Cid dhibaato xirfad la'aan iyo xoolo la'aan haysato.

223:Gunto=Xirashada sida macawista,marada l.w.m.

224:Tabantaabo=Taageero

225:Tahar=Cad adag oo wax seedo la moodo ku dhex jiraan sida boga.

226:Miyir=Caqli.

227:Dugaal=Wehel.

228:Tookh=Faan iyo war qob weyni ku jirto.

229:Taabo=Hanto oo haleelo,gacanta gaarsii.

230:Ormayn=Dabogol sida kolka geelu is dabo socdo..

231:Gorfeyn=Baaraandegid,falanqeyn.

232:Allayl=habeen.

